

Xoojiyaha Kovid-19 Bivalent

Waa maxay farqiga u dhexeeya xoojiyaha bivalent iyo kuwii hore?

Tallaalka Kovid-19 bivalent wuxuu leeyahay laba qaybood si uu u bixiyo difaac wanaagsan: hal qayb waa midka loogu talagalay tallaalka asalka ee fayraska KOVID-19, iyo qaybta kalena waa midka loogu talagalay kala duwanaanshaha Omikron.

Goorma ayaan helayaa xoojinta bivalent?

Koox kasta oo da'ah waxay yeelan karaan xaq ka duwan midka kale. Kooxaha soo socdaa waxay xaq u leeyihiin muddo gaaban oo u dhaxaysa qiyaasaha:

- Dadka da'doodu tahay 70 iyo kawayn
- Dadka da'doodu tahay 12 iyo kawayn kuwaase oo difaaca jirkooda si dhexdhexaad ah ama aad u daran
- Dadka da'doodu tahay 12 iyo kawayn ee degan goobaha daryeelka muddada-dheer ama goobaha nolosha waayeelka
- Dadka da'doodu tahay 55 iyo kawayn ee ah dadka ummadaha hore
- Dadka da'doodu tahay 50 iyo kawayn ee ah Afrikaanka Nova Skoshiya
- Dadka uurka leh

Si aad u hesho talooyinka ugu casrisan/cusub, fiiri/hubi <https://www.nshealth.ca/coronavirusvaccine>. Haddii aad hayso su'aalo fadlan wac: 1-833-797-7772 (Isniin ilaa Jimce, 7 subaxnimo ilaa 7 galabnimo iyo Sabti ilaa Axad, 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo). Tafsiir ayaa lagu siinayaa markaad wacdo lambarkan.

Miyay u baahan yihiin shakhsiyaadka uurka leh ama naaska nuujinaya xoojinta bivalent?

Haa Caafimaadka Dadweynuhu wuxuu si adag ugu talinayaa dadka qorsheynaya uur, ama uur leh ama naaska nuujinaya, inay helaan tallaalkooda KOVID-19. Sida kor ku xusan, dadka uurka leh waxay xaq u leeyihiin muddo gaaban.

Haddii aan hore u lahaa Kovid, goormaan helayaa xoojinta bivalent?

Waxay kuxirantahay inaad qaadatay tallaalkaada aasaasiga ah iyo inkale. Fadlan tixraac qaybta: "U-qalmitaanka Tallaalka Soo Kabashada Ka Dib ee KOVID-19" ee boggan internetka: <https://www.nshealth.ca/coronavirusvaccine>

Isku mar ma heli karaa tallaalka hargabka iyo xoojiye KOVID-19?

Haa Dadka da'doodu tahay 5 sano iyo ka weyn waxay si ammaan leh u qaadan karaan tallaalka hargabka ka hor ama ka dib ama xitaa isla wakhtiga tallaalka xoojiyaha. Tani waxaa laga yaabaa inay isbeddel ka imaato si loogu daro carruurta yaryar. Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri/hubi

https://novascotia.ca/flu/?gclid=EAlaIqobChMI-4uuzdrE_AIVDTizAB3VMg1JEAAYASAAEgJYyFD_BwE

Isku mar ma heli karaan carruurtaydu tallaalkada kale ee carruurta iyo xoojiyaha KOVID-19?

Waxay ku xiran tahay. La hadal xirfadlaha daryeelka caafimaad si aad u go'aamiso waqtiga leh tallaalkada KOVID-19 iyo tallaalkada kale aan ahayn KOVID-19.

Sidee bay ammaan u tahay in la qaato tallaalka Kovid-19?

Marka lagu tallaalo ka dib, waa wax caadi ah inaad yeelato waxyeelo saamayn ah ee ku meel gaar ah. Kuwani badanaa waxay socdaan dhowr saacadood ilaa dhowr maalmood tallaalka ka dib.

Waxyeellooyinka caadiga ah waxaa ka mid ah guduudasho, barar iyo/ama xanuun meesha aad cirbadda

ka qaadatay. Waxaa jiri kara waxyeelo saamayn guud oo badan sida daal, qarqaryo, qandho fudud, madax xanuun, murqo xanuun iyo xanuunka kalagoosyada. Tani waa jawaabta dabiiciga ah ee jirku si uu u dhiso difaac.

Waxaa jirta fursad yar oo fal-celin xasaasiyadeed oo halis ah ka yimaado tallaalka loo yaqaan "anaphylaxis". Waxay badanaa dhacdaa wax yar ka dib marka qofku qaato tallaalkaasi waana la daweyn karaa. Taasi waa sababta lagu weydiin doono inaad joogtid rugta caafimaadka ugu yaraan 15 daqiiqo tallaalka ka dib si ay shaqaaluhu u daawadaan falcelintan dhifka ah oo ay si dhakhso ah u daaweeyaan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhibaatooyinka soo raaca ah, fiiri <https://www.nshealth.ca/coronavirus-what-expect-covid-19-vaccine-clinic>

Haddii aan tallaalka Kovid 19 ka qaatay waddan kale, miyaan qaataa xoojinta bivalent?

Haa. Si kastaba ha ahaatee, diiwaanada tallaalkaagu waa inay ahaadaan kuwo cusub oo ku jira nidaamka caafimaadka Nova Skoshiya ka hor inta aadan ballansan tallaalka xoojinta.

Waxaad caddaynta tallaalka aad ka qaadatay waddan kale ama gobol kale ka soo dejisan kartaa xiriirkan interneetka: <https://vaccineentryservice.novascotia.ca/>. Diiwaanadaadu waxay qaadan karaan dhawr toddobaad in la cusboonaysiiyo.

Sideen ku heli karaa caddaynta tallaalka?

Waxaad ka heli kartaa caddayntaada tallaalka halkan: <https://novascotia.flow.canimmunize.ca/en/portal> Fadlan ogow in qiyaasahaagii hore ee aad ka qaadatay waddan kale si toos ah aysan uga muuqanayn nidaamkan ilaa aad soo dejiso, sida lagu sharaxay su'aashii hore.

Sideen ku heli karaa xoojinta bivalent?

Kahor intaadan bilaabin:

- Waxaad u baahan tahay kaarka caafimaadka Nova Skoshiya oo ansax ah si aad ballan uga qabsato onlayn ka.
- Haddii aadan haysan kaarka caafimaadka, wac 1-833-797-7772. Tarjumaan waa la heli karaa.
- Haddii aad ballansanayso qiyaas dheeraad ah ama xoojinaysa tallaalka KOVID-19, waxaa laga yaabaa in lagaa rabo inaad muujiso caddaynta u-qalmitaanka xoojiyaha. Tani waxaa lagaaga baahan yahay in tallaaladaadii hore ee KOVID-19 yihiin kuwa cusub ee la'qoonsanyahay nidaamka Nova Skoshiya. Si aad u soo dejiso qiyaasahaaga aad ka qaadatay waddan kale ama gobol kale, aad bogga interneetkaan kan: <https://vaccineentryservice.novascotia.ca/>

Sida Ballanta Loo Qabto:

- La xiriir khadka tooska ah ee rugta caafimaadka: <https://novascotia.flow.canimmunize.ca/en/covid-flu-booking>
- Wac 1-833-797-7772 (Isniin ilaa Jimce, 7 subaxnimo ilaa 7 galabnimo iyo Sabti ilaa Axad, 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo).
 - Wac 1-833-797-7772 (Isniin ilaa Jimce, 7 subaxnimo ilaa 7 galabnimo iyo Sabti ilaa Axad, 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo).
 - Haddii aad u baahan tahay tarjumaan, wac lambarkan si aad ballan u qabsato (in ka badan 125 luqadood oo kala duwan ayaa diyaar ah).

- Markaad wacdo lambarkan, takhtar takhasus leh ayaa kula mari doona su'aalaha baaritaanka caafimaadka wuxuuna ka jawaabi doonaa welwelkaaga ku saabsan tallaalka.
- Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri bogga internetka ISANS [How to Book a Vaccine Appointment - Project Beacon](#)

Sida Loo Helo Rug Caafimaad ee Ballan La'aan

- Waxa kale oo tallaalo lagu bixiyaa rugaha caafimaad ee ballan la'aan la tagi karo ee kala duwan. Goobahan iyo waqtiyadani waxay is beddelaan toddobaad walba. <https://www.nshealth.ca/drop-in-vaccine-clinics>
- Farmasiyada waxay kaloo bixiyaan rugaha caafimaadka: <https://pans.ns.ca/walk-covid-19-vaccine-clinics>
- Farmasiyadu waxay sidoo kale bixin karaan buug yar ee luqado kala duwan ku qoran yihiin marka macaamiishu qaataan tallaalkooda